Waaridiinta sharafta leh,

Waxaan rabnaa in aan qoys ahaan iyo gaar ahaan Cunugaaga idin ku soo dhawayno Warqaddaan anagoo ah Xarunta Xannaanada. Booska uu Cunugaaga ka helay Xannaanada, waa fursad aad u fiican, si uu ula qabsado Wadanka Jarmalka. Wuxuu halkaan ka helayaa nolol caadi ah, khibrad wanaagsan, in uu la ciyaaro Carruur kale, iyo waxbarashooyin badan. Kuwaasoo kamid yihiin barashada Luuqadda Jarmalka. Carruutu markay da'daas jiraan waxay si dhakhsa ah oga baranayaan kuwa la faca ah.

**Xaq u lahaanshaha booska Xannaanada iyo Tabarruca bilaa lacagta ah**

Wadanka Jarmalka wuxuu Cunug kasta, oo sanad gaaray xaq u leeyahay in uu helo boos Xannaano. Xannaanooyinka Gobolka Rheinland-Pfalz haddii uu Cunugu gaaro labo sano hayntiisa waxay Waaridiinta u tahay  lacag la'aan. Xannaanooyinku waxay leeyihiin boosas dhiman iyo boosas malintiyoo dhan ah . Boosku hadduu yahay mid dhiman Carruurta waxaa la keeni karaa subaxdii waxaana lasoo celin karaa bareegga qadada kadib. Hadduu boosku yahay mid maalintiyoo dhan ah, waxay Carruurtu joogi karaan maalitiyoo dhan waxaana Xannaanada laga siinayaa qado.

**Hawsha ay Xannaanadu qabato iyo la qabsashada**

Xannaanada hawsheeda waa barbaarinta, wax baridda iyo haynta. Waa waajib saaran in ay si wanaagsan Carruurta u daryeelaan. Ulajeedaduna waa in la baro Carruurta sidii ay u noqon lahaayeen shakhsi ahaan kuwo Mas'uuliyad qaadi kara, xagga Bulshadana noqdaan kuwo karti leh oo Danahooda yaqaana iyo in xiisahooda ku saabsan Adduunka laga caawiyo. Saa darteed tusaale ahaan waxaa Qolalka loo habeeyay, sidii ay Carruurtu kaligood ugu ciyaari lahaayeen waxyaalaha lagu ciyaaro  una  baroobeeyaan. Barayaasha Xannaanada waxay fiirinayaan waxyaalaha uu Cunugaagu jecelyahay in uu ku ciyaaro, oo ay markaas isku dayayaan, sidii uu uheli lahaa waxyaabahaas. Waxaa intaas dheer in uu Cunugaaga helayo Fursad uu kula ciyaaro Carruur kale, waxna ka barto islana bartaan.

Si uu Cunugaagu meesha oga helo waxaa muhiim ah, in uu helo xiriir fiican oo ka dhaxeeyo asaga iyo Barayaasha Xannaanada. Saa darteed waa in Cunugaagu si tartiib ah meesha ula qabsado. Waalidiinta waa in ay maalmaha iyo Todobaadyada ugu horeeya u raacaan  Xannaanada. Wakhtiga uu Cunugu Waarid la'aan joogi karo, ayaa maalimba maalinta ka dambaysa loo kordhinayaa ilaa uu Cunugu kaligiis Xannaanada joogi karo.Waxay inta badan qaadataa qiyaas ahaan afar todobaad. Waxaad Arrintaas si faahfaahsan ogala hadli kartaa Barayaasha.

**Wax barashada iyo iskaashiga Barbaarinta**

Adiga Waarid ahaan waxaad Xannaanada u tahay Lamaane muhiim ah, maadaama uusan jirin qof Cunugaaga kaaga aqoon roon. Waxaad ogtahay tusaale ahaan cuntada uu jecelyahay, sida loo dajiyo iyo waxyaabaha uu jecelyahay in uu ku ciyaaro. Xannaanooyinka waxay rabaan in ay Waalidiinta isla shaqeeyaan. Isla shaqaynta waxay leedahay noocyo kala duwan: Wadahadalka xiliga soo doonidda iyo kasoo kaxaynta, waraysiga Waalidiinta, kulanka Waalidiinta, qaxwaysiga Waalidiinta iwm.

Aas aasiga wada shaqaynta waxay inta badan ku qorantahay qandaraaska Barayaasha, kuwasooy kula heshiiyaan kuwa maamulka[1] Xannaanada haya. Arrintaas warbixiteeda waxaad ka helaysaa Xannaanada.

Fadlan waydii Xannaanada wixii su'aalo ah oo ku xiran Caruurta waxbarashadooda, iyo in aad u sheegtid wixii adiga muhiim kuu ah oo ku saabsan Cunugaaga barbaarintiisa. Waa in lagawada hadlo fikradaha Barbaarinta.

---

[1] Maamuliinta Xannaanooyinka waa Komuunaha, waxaa kaloo jira Kaniisadda afangeelisha iyo katooligga ama Waalidiinta dadaala.

Isku day bilawga hore in aad heshid fursad ama qof Xannaanda kaaga turjuma, si aad isu fahantaan Barayaasha Xannaanada ka shaqeeya. Ka faa'iidayso Fursadda wadashaqaynta. Waxay xataa taasu kaa cawinaysaa in aad Xannaanada Dad xiriir kala yeelatid.

**Waxbarashada Diinta**

Xannaanooyinka waxaa ku kulma Carruur iyo Dad waawayn oo kayimid Wadamo kala duwan, lehna Jinsiyado, dhaqamo iyo Diinan kaladuwan. Waxbarashada Diinta waa Mawduuc laga hadlo Xannaanooyinkoo dhan. Rheinland-Pfalz waxaa jira Xannaanooyin ay leeyihiin Waalidiinta dadaala, Komuunaha iyo kuwo kale ooy leeyihiin tusaale ahaan, Kaniisada afangeelisha iyo katooligga. Kuwaasu nolol maalmeedkoodu waa wax diinta kiristianka ku xiran. Adiga iyo Cunugaagaba waa la idin kasoo dhawaynayaa Xannaanooyinkaas iyo sidoo kale diintiinaba. Waxaa haboon in aad ka waraysatid markaad Cunugaaga Xannaanada ku qoraysid say tahay waxbarashada diinta iyo habka Xannaanada Diinta loogu dhaqmo.

**Luuqadda asalka, barashada Luuqadda iyo dhiirigalinta Luuqadda**

Luuqadda waa midda keenaysa in uu qofku cilaaqaad la yeesho bey'adda uu ku dhexnoolyahay iyo in uu fahmo. Saa darteed waa lagama maarmaan in uu Cunugaaga barto Luuqadda Jarmalka. Carruurtuna waxay Dadka waawayn oga duwanyihiin in ay si dhakhsa ah ku bartaan Luuqad qalaad. Xiriirka ay kula yeelanayaan Xannaanada Carruur kale oo da'dooda ah ayaa taas u fududaynaysa. Waana muhiim in uu Cunugu ku faani karo Luuqaddiisa asalka ah. Cunugu haddii uu Luuqaddiisa hooyo si fiican u yaqaano oo dadka ku hareeraysanna aqbalaan, markaa kaliya ayuu si degan oo xiise leh u baran karaa Luuqad kale. Barayaasha way la socdaan Arrintaas wayna ka caawinayaan Cunugaaga.

Xannaanooyin badan oo ay ku badanyihiin Carruuraha kasoo jeeda Waalidiita ajinabiga ah, waxaa si dheeraad ah Carruurtaas laga kabaa xagga Luuqadda iyo in ay Xannaanooyinkaas leeyihiin shaqaale ku takhasusay dhaqamada kala duwan oo ay ka caawinayaan hawlahaas. Dadkaas qaarkood waxay kasoo jeedaan Waalidiin ajinabi ah iyo in ay dhinacaas ku leeyihiin waayo argnimo badan, micnaheeduna tahay in ay ogyihiin dhibka ay leedahay ku dhexnoolaanshaha Wadan shisheeye.

**Xannaanooyinka oo ah meel ay Dadka ka helaan caawitaano iyo – waxyaalo kale**

Wadankaan Jarmalka ah waxaa jira Caawitaano badan oo loogu talagalay qoysaska da'da yar. Xannaanooyinka waxay inta badan xiriir fiican la leeyihiin qaybo kamid ah Magaalada iyo in ay ogyihiin caawitaanada aad qoys ahaan heli kartaan oo aad istimaali kartaan. Laakiin waxaa kaloo jira Waalidiin og caawitaanada Magaalada laga heli karo, tusaale ahaan Xarumaha la talinta, koorasyada Luuqadda oo Waalidiinta loogu talagalay, iyo ururo kale. Fadlan ka faa'iidayso Fursadaha aad haysatid, oo baro Luuqadda Jarmalka, si'aad Wadanka Jarmalka si fiican ola qabsatid. Waxaa jira ururo badan oo kala duwan tusaale ahaan xagga isboortiga, kuwaasood ka helikartid adiga iyo qoyskaagaba xariiro. Laakiin waxaad kaloo ka heli kartaa caawitaano iyo su'aalo ku saabsan Barbaarinta ama khibradaha aan fududayn oo aad soo martay, tusaale ahaan qaxidda iyo cayrsashada waxyaalahaasoo dhan oo lagaa caawinayo. Fadlan ha ka niyad jabin. Anaga na waydii oo nala soo xariir anaga Barayaasha Xannaanada ah iyo Waalidiinta kale. Waa wax u qalma!

Waxaan idiin rajaynaynaa Jarmalka dhexdiisa nolol khayr badan!